Warbixinta Hore: Waxyaabihii laga helay Shirkii Dhisida Caafimaadka Bulshooyinka Magaalada Hights. *Masawirka guud*

Hogaamiyayaasha Shirkii Guriga ee Mid-City CAN waxay wareeysteen dad gaaraya 1550 ruux oo degan Magaalada Heights. Shirarkaasi waxay ka kala dhaceen qeybo kala duwan oo magaalada Heights si ay u wareystaan dad dhaqan iyo luqado kala duwan leh oo ay ka mid yihiin, Burmese, Somali, Carabi, Isbaanish, iyo fiyatnaameeys.

Aragtida Dadka degaanka ee Caafimaadka Bulshada:

1. 45% dadkii ka soo jawaabay daraasadu waxay ku tilmaameen in caafimaadka bulshadu uu yahay mid **aan caafimaad qabin**.
2. **20.5% dadkii la wareeystay waxay ahaayeen kuwo shaqo la'aan ah.**
3. "Dareenka Nabada" ee guryahooda, bulshada iyo iskuulku waa mid ka **hooseya inta caadiga**.
4. 75% waxay ka cabsanayaan gaangis iyo muqaadaraadka derisyadooda.
5. 18.6% waxay ka cabsadaan inay maalintii lugeeyaan iyo 46.6% waxay ka cabsadaan socodka hebeenkii.
6. Haweenka ayaa inta badan cabsada habeenkii.
7. Nimanku inta badan maalintii ayay cabsadaan.
8. 62% qoysasku waxay ka welwelayaan in caruurta qoyskoodu aanay dhamaysan waxbarashada dugsiga sare.
9. 13% waxay soo sheegeen in ay ayagu ama xubnaha qoyskoodu qabaan neef ama sonkorow.
10. 70% dadka lagu arkay inay qabaan neef ama sonkorow ma qaataan daawo.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Xarumaha Bulshadu inay bixiyaan howlaha caawinaada si ay u bartaan xirfado cusub iyo u helaan tababaro u ogolaanaya inaya helaan shaqo iyo helaan nolol tayo sare.
2. **Ka hortaga denbiyada iyadoo loo sameeynayo degaanka nalalka wadooyinka la maro.**
3. La socoshada iyo ilaalinta wadooyinka la maro.
4. Xafladaha ilaalinta bulshada iyo derisyada.

Isbedelka Ciidamada Nabadgelyada:

1. Booliis fara badan oo ilaala.
2. Sharuucda booliska oo laga yareeyo qiimeynta midabka iyo ilaalin qatarinaysa dhaqanka.
3. Ciidamada nabadgelyada oo si degdeg ah uga jawaaba markii la soo waco.
4. "Meel nabad ah" oo dadka aan sharciga lahayni ku soo sheegi karaan denbiyada.

Helitaanka iyo Tayada Xanaanada Caafimaadka

1. Helitaanka iyo tayada xanaanada caafimaadku waa mid aad u hooseeysa.
2. 51.2 boqolkiiba dadkii la wareeystay ma aanay lahayn ceymis caafimaad.
3. 70 ka mid ah dadkii Latinos-ka ahaa ee la wareeystay ma aanay haysan ceymis caafimaad.
4. Dadka intooda badan guryaha ku leh Magaalada Heights ma ay haystaan ceymiska caafimaadka.
5. 49.2% kuma aanay faraxsanayn howlaha caafimaadka ee hada loo qabto.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Howlo fiican oo ay klinigyadu u qabtaan oo leh dhaqaatiir qadarin leh iyo kalkaalisooyin.
2. Helitaan degdeg ah oo ah xanaanada caafimaadka caruurtooda.
3. Howlaha baaritaanka caafimaadka iyo ka hortaga cudurada oo dheeraad ah.
4. Helitaan fiican oo ah xanaanada ilkaha iyo daawooyin raqiis ah.
5. Waxbarashada isku tagitaanka oo ku haboon dhaqanada iyo la taliyayaasha dagaalka qoyska (domestic voilence).
6. Tababaro caafimaadka guriga ah.

Guryaha Magaalada Heights

1. Guryaha la iibsan karaa wey ka yar yihiin xadka caadiga ah dadka intiisa badana waxay degan yihiin guryo ijaar ah.
2. Tayada guryuhu waa mid hooseeysa dadka degana waxay badanaaba ka dacwoodaan molds, baranbaro, iyo qatar kale oo xaga caafimaadka.
3. Dadka guryohooda lahi waxay ka yar yihiin (4%) ee dadka ka soo jeeda Aasiyaana iyo qaxootiga Afrikaanka.
4. 13 boqolkiiba dadkii la wareeystay ee Latiinka ahaa waxay leeyihiin guryo.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Guryo fara vadan oo lagu iibsan karo daqliga soo gala oo ah (isku celcelis ahaan $25,000).
2. In gudiga ijaarku uu ka caawiyo ilaalinta ijaarka iyo dhaqangelinta sharciga guryaha.

Si aad u aqriso warbixinta oo buuxda ka eeg website-keena ah http://www.midcitycan.org/files/Data/100119-BHC_Preliminary_Findings.pdf

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Hogaamiyayaasha Guriga Shirarka iyo Habka Dhisitaanka Caafimaadka Bulshooyinka, Fadlan kala xariir Maamulaha Iskuduwayaasha Nohelia Patel 619/283-9624 x 217 iyo email-ka ah npatel@midcitycan.org.

Warbixinta Hore: Waxyaabihii laga helay Shirkii Dhisida Caafimaadka Bulshooyinka Magaalada Hights. *Masawirka guud*

Maqaayadaha iyo Cuntada la jecel yahay:

1. Dadka degaanku waxay caadi ahaan maqaayadaha wax ka soo cunaan 4 mar bishiiba.
2. Maqaayada cuntada degdegta ahi waa ku badan yihiin.
3. Caruurtu sido kale waxay jecel yihiin inay cunaan pidzaha iyo rootiga iyo hilibka inta badan.
4. Qudaarta ay cunaan caruurtu waxay ka yar tahay inta lagu taliyay inay maalintii cunaan ee ah 3-5 xabbo. Tirada qudaarta ay cunaana waxay aad u yaraataa bisha dhamaadkeeda.
5. 30% dadkii ka soo jawaabay waxay qudaarta ka ka helaan Suuqa Beeraleeyda.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Inay wax badan ka bartaan beeraha bulshada iyo ka qeyb galaan.
2. Inay helaan cuntada dhaqanka oo badan oo lagu gado dukaanada (sida hilibka xalaasha ah).
3. In cunto caafimaadka u fiican iskuulka laga bixiyo.

Sida ay dadka degaanku u safraan?

1. 58.4% dadka degaanku waxay u isticmaalaan safarada baabuurtooda, (Xadka wadankuna waa 82.4%)
2. Socodku waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah tagitaanka meelaha (10.9 boqolkiiba).
3. Baska waxaa isticmaala 13.2% (Xadka wadankuna waa 2.96%).
4. 17.9% dadka Laatiinka ah 14.8% dadka Afrikaan Ameerikaanka ah ayaa isticmaala basaska.
5. Dadkaasina kuma ay faraxsana tayada gaadiidkaas.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Bulsho loo socon karo iyo gaadiid fiican leh.
2. Basas fara badan oo kale.
3. Gaadiid haboon oo loo isticmaali karo howlaha mucaawinooyinka iyo curyaanimada.
4. Meelaha baska loo istaago oo la hagaajiyo.

Mashruucaan waxaa miisaaniyadiisa ku deeqay hayada California Endowment taariikhdii ahayd: Janaayo 26, 2010.

Caruurta iyo Dhalinyarada Magaalada Heights:

1. Howlo iyo fursado aan ku filnayn caruurta iyo dhalinyarada.
2. Ma laha paark iyo howlaha dalxiiska oo ku filan.
3. Tiro xadadan oo yar oo ah howlaha iskuulka ka dib oo tayo leh, ama barnaamijyada xagaaga.
4. Nabadgelyada iskuulku waa ka yar tahay xadkii loogu talo galay sababtoo ah iskuulka waxaa jooga gaangis.
5. 40.9% dadkii ka soo jawaabay daraasadu waxay ku sheegeen tayada waxbarashadu inay tahay mid hooseeysa.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. Barnaamijyada iskuuka ka dib iyo kuwa xagaaga oo badan oo ay dhalinayaradu u diyaariyeen dhalinyarada kale.
2. Barnaamij ay soo diyaariyeen dhalinyarada oo lagu yareeynayo ka maqnaashada iskuulka.
3. Hab caawinaad ah oo adag oo la siiyo dhalinyarada gacanta lagu hayo.
4. Ka hortag ku saleeysan iskuulka oo lagu caawinayo caruurta qatarta ku jirta ee dugsiyada dhexe.
5. Macalimiinta iskuulka oo kala qoloyiin duwan oo si fiican loo soo tababaray si loo yareeyo "maskax qalajinta".
6. La taliyayaal badan si aanay macalimiintu u qaban howlo fara badan.

Waxyaabaha Dadka degaanku doonayaan:

1. La xisaabtanka hayadaha qabanaya howlaha.
2. In si cad loo sheego howsha Dhisitaanka Caafimaadka Bulshada
3. Isgaarsiinta (30% ma ay haystaan helitaanka internetka).
4. Lacagtu waa inay joogtaa bulshada dhaxdeeda ee aanay "ku xayirnaan" hayadaha.

Si aad u aqriso warbixinta oo buuxda ka eeg website-keena ah http://www.midcitycan.org/files/Data/100119-BHC_Preliminary_Findings.pdf

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Hogaamiyayaasha Guriga Shirarka iyo Habka Dhisitaanka Caafimaadka Bulshooyinka, Fadlan kala xariir Maamulaha Iskuduwayaasha Nohelia Patel 619/283-9624 x 217 iyo email-ka ah npatel@midcitycan.org.